



## Dugsiyada Dadweynaha ee Shakopee

Laga bilaabo Arbacada 18ka Maarso, Dugsiyada Dadweynaha ee Shakopee waxaya qaab cusub ku bixinayaan adeeg cunto. Waxaa degmada dhan laga hirgelinayaa oo helayaa qaadashada iyo keenidda cuntada oo lugu keenayo basaska dugsiyada.

Laga bilaabo Arbacada 18ka Maarso ilaa xilligii gadaal laga iclaamiyo qaybinta cuntada ee caruurta oo dhan waxaa loo heli karaa labo siyaabood:

Qaadasho Cunto ee Degmada oo Dhan: Dugsiyada Dadweynaha ee Shakopee waxay cunto bacaysan caruuraha dhan ugu qaybin doontaa hab aad baabuurkaaga adigoo ku jiraa uga qaadanaysid Dugsiga Sare ee Shakopee laga bilaabo 11:00 subaxnimo ilaa 1:00 galabnimo.

Cunto Keenid ee basaska dugsiyada: Dugsiyada Dadweynaha ee Shakopee waxay Palmer Transportation ka kaashanayaan geynta in ay cuntooyin geeyaan xarrumo kala duwan ee degmada. Cuntooyinka waxaa Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 11:00 subaxnimo iyo 11:30 la keenayaa xarrumahaan.

- Mobile Manor
- Jackson Heights
- Bonnevista Terrace
- Valley Haven
- Eagle Creek Townhomes
- Sarazin Flats Apartments
- Clifton Townhomes
- Sweeney Elementary
- Pearson Elementary
- East Middle School

<https://www.shakopee.k12.mn.us/Page/10036>

## Dugsiyada Dadweynaha ee Jordan

Kala doorashada Cuntada Caruurta ee **Arbacada 18ka Maarso iyo Qamiista 19ka Maarso OO KELI AH**

Waxaan diyaarinaynaa kala doorashada labo goobood ee laga qaadan karo cuntooyinka ardayda maalmaha kor ku xusan. Cuntooyinku waa BILAASH waxayna u furantahay ardayda DHAN ee **Dugsiyada Dadweynaha ee Jordan iyo St. John's**.

Goobta 1aad: Jordan High School

- Cuntooyin Qaado oo la tag ah
- Gaarigaaga la soo mar dinaca galbeed ee dismaha. Agagaarka halka laga galo qaybta Jimicsiga.
- 11:00 subixii ilaa 12:00 duhurkii

Goobta 2aad: Valley Green Community Center lot

- Cuntooyin Qaado oo la tag ah
- Xarrunta Bulshada ee Valley Green deydkiisa baabuurta la dhigto (basaska ayaa goobtaas keenaya cuntada)
- 11:00 subixii ilaa 12:00 duhurkii

Arday **WALBA** wuxuu cunto ka qaadan karaa mid ka mid ah goobahan. Ardaygu waa **QASAB** in uu soo xaadiro si loo siiyo cuntada. Cunto ma jiri doonto xilliga fasaxa Spring Break. Degmadu waxay ka tashanaysaa qorshe cusub oo bilaabanaya Isniinta 30ka Maarso (Bilowga Waxbarasha Fog ee COVID-19) eek u salaysan amarka ka yimid gobolka.

<https://www.jordan.k12.mn.us/covid19>

## Dugsiyada Dadweynaha ee Belle Plaine

Dugsiyada Dadweynaha ee Belle Plaine wuxuu bixinayaa cunto arday walba oo dalbada adeeg cunto. Adeega cunto bixintu wuxuu u dhacayaa sidatan:

1. Waxaan qoysaska la wadaagaynaa talo ururin si loogu diiwaan geliyo cuntada.
2. Waxaan arrimaha la xiriira cuntada ku war gelinaynaa email-lada, Schoology, bogga website-ka BP, iyo Facebook.
3. Waxaan cuntooyinka ku keenaynaa basaska kala ah (182 meesha joogtada looga qaado ilmaha/12 SPED routes), Ka qaado oo la tag xarrunta dugsiga saree e Belle Plaine.

Laga bilaabo **Arbacada 18ka Maarso**, waxaan dugsiga sare ku bixinaynaa cunto Qaado oo la tag ah ee caruurta. Waxaad cuntaga qaadan karta inta u dhexaysa 10:00 subaxnimo iyo 1:00 galabnimo. Haddii aad danaynayso in ilmahaagu helo cunto qado iyo quraac ah, fadlan buuxi TALO URURINTA.

Laga bilaabo **Arbacada 19ka Maarso** 2020, waxaan dugsiga sare ku bixinaynaa Qaado oo la tag 10:00 subaxnimo ilaa 1:00 galabtii iyo meesha basasku ilmaha u istaagaan 4 saacadood kaddib xilliga caadiga ah ee maalin walba ee Isniin ilaa Jimco ah. Matalan, haddii basku uu ilmahaaga qaadi jiray 7:20, cuntada waxaa la keeni doonaa 11:20. Maadaama uu nidaamkani yahay mid cusub, fadlan sii dhowr daqiiqo oo dheeraad ah in uu yimaado basku.

**Waalidka, guardian-ka, ama cunuga ayaa qaadi kara cuntada.** Cunug walba helayaa hal xirmo oo keli ah. Haddii aad cuntada kaga qaadanysid dugsiga nidaamka 'Qaado oo la tag', fadlan waxaad xasuusisaa ilmahaaga in laga filaayo in uu xirmada cuntada ah qaato oo uu isla markiiba xarrunta dugsiga iskaga tago. Fadlan, xasuusi ilmahaagu in ay aad u taxaddaraan caafimaadkooda awgiis marka ay joogaan goobta basku istaagayo.

Haddii aad u qalantid cuntada bilaashka ah/ama qiimeheeda la dhimo, fursaddaasi weli way furanaanaysaa.

Haddii aad ka mid tahay barnaamijka dugsiyada Belle Plaine ee 'backpack program' waxaa hadda lagu bixinayaa Foo Shelf-ka.

<https://www.belleplaine.k12.mn.us/>

## Dugsiyada aagga New Prague

Dugsiyada Aagga New Prague waxay bixinaysaa qaadasho cunto ee drive-through laga bilaabo **Arbaco 18ka Maarso**. Quraac IYO qado ayaa diyaar u ah in hal xilli la isku qaato. Xarrumaha laga qaadan karo waxaa ka mid ah:

- Falcon Ridge Elementary School
- Eagle View Elementary School

Cuntadu waxay diyaar tahay **11:00 subaxii ilaa 12:00** duhurkii waxaana lagu qaybinayaa bannaanka irrdaha hore ee dugsiga labadiisa dhinac. Qoysasku baabuurkooda ayagoo ku jira ayay imaanayaan oo qaadanayaan quraacda iyo qadada isku mar.

<https://www.npaschools.org/COVID-19>

### Dugsiyada Aagga Prio Lake-Savage

Laga bilaabo 30ka Maarso, waxaa Dugsiyada Aagga Prio Lake-Savage u jiri doona qorshe cuntada laga qaadanayo waddada qarkeeda. Degmadu waxay nidaam 'Qaado oo la tag' ah ku bixinaysaa qado iyo quraac bacaysan ee ardayda oo dhan. Warbixin dheeraad ah waxay soo socotaa 30ka bisha agteeda.

<https://www.priorlake-savage.k12.mn.us/about-us/coronavirus-virus>

### Degmo Dugsiyeedka Burnsville-Eagan-Savage

District 191 waxay cunug walba oo da'diisu u dhaxayso 1 ilaa 18 jir u diyaarisay cunto 'Qaado oo la tag'. Laga bilaabo **Arbaco, 18ka Maarso** waxayna socon doontaa maalmaha isniin ilaa jimco ah inta laga gaarayo ugu yaraan **Jimcaha 27ka Maarso**.

Cuntado waxaay ku diyaar tahay wadada qarkeeda labadan goob laga bilaabo **11:00 sabixii ilaa 1:00 galabkii**.

- Nicollet Middle School (Irida #20 ee u dhow iridka hore), 400 E 134th St. Burnsville, MN 66337
- Eagle Ridge Middle School (u dhow iridda goobta dubaasha), 13955 Glendale Road, Savage, MN 55378

Caruurtu waxay heli karaan 2 cunto maalin walba (1 quraac iyo 1 qado cunuugiiba maalintiiba). Ciyaalku waa in ay shaqsi ahaan xaadir yihiin si ay cunto u helaan. Qofka jirran ama lagu arko calaamadaha cudurka yaynan soo qaadin cuntada.

[www.isd191.org/coronavirus-covid-19-information/student-meals](http://www.isd191.org/coronavirus-covid-19-information/student-meals)

### Dugsiyada Aagga Lakeville

Dugsiyada Aagga Lakeville waxay Lakeville North High School ardayda cunto ugu diyaarinayaan nidaam ah drive-up ah. Waxay sidoo kale basaska dugsiyadu cuntada keenayaan goobo ku faafsan degmada oo dhan. Care packs ay ku jirto alaabaha isuulada ayaa iyaguna diyaar ugu ah goobaha keenidda iyo qaadashada cuntad qoysaska u baahan.

Cuntada iyo alaabahaas waxaa la bixinayaa berry, **Arbaco, 18ka Maarso** iyo **Qamiis, 18ka Maarso**. Ma jiri doonto cunto qaybin xilliga Spring Break inta u dhaxaysa 20-27. Haddii xiridda dugsiyadu laga sii kordhiyo intaas kaddib, cunto iyo alaab qaybintu waxay dib u bilaabanaysaa **30ka Maarso** si joogto ah Isniin ilaa Jimco.

[isd194.org/news/covid-19-information-update/](http://isd194.org/news/covid-19-information-update/)